

Maxaa iska isbeddelaya ADEEGYADA DD?

Dhowrka bilood ee soo socda, waxaa dhici karta in aad maqasho hadal loogu yeero "adeegyada koox ahaaneed".

Ma jiraan wax ku saabsan adeegyadaada oo isbeddelaya hadda la joogo.

Iyada, ka hor inta isbeddelkani ku imaanaya nidaamkayaga uusan dhaqan galin, waxaad heli doonta macluumaad dheeraad ah oo ka socda Xafiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) iyo Iskuduwahaaga Adeegyada ama Wakiilka Shakhsiyeed.

Sidee baa hawshu u ekaan doontaa mustaqablka?

1

QIIMEYNTA

Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA) waa hab gacan ka geysta oggaanshaha dhinacyada nolosha ee laga yaabo in taageero looga baahdo.

2

QORSHAHA TAAGEERADA SHAKSI -ISP

Kani waa qorshahaaga - Kani waa hab lagu oggaado waxa hadafyadaadu yihiin, waxa aad daneynayso iyo waxa sida wanaagsan kuugu shaqeeya (Waxa aad rabto iyo waxa aad u baahan tahay). Wuxuu sidoo kale tilmaamayaa waxa aad rabto in aad diiradda saarto sanadka soo socda iyo sida aad jeclaan lahayn in aad u gaarto hadafyadaasi.

3


ADEEGA KOOX AHAANEED - TANI WAA QAYB CUSUB

Tani waxaa lagu go'aamiyaa Qiimeynta waxayna gacan ka geysataa isku wargelinta ilaa xadka waxa Adeegyada DD ay ku bixin karaan iyaga oo qayb ka ah ISP-gaaga.

KA XIGA

Maxaa iska isbeddelaya ADEEGYADA DD?

Iyada oo loogu talagalay dadka helaya adeegyada shaqada, iyo dadka ku nool guri ay iska leeday hay'ada daryeelka bixisa



Maxay tani iiga dhigan tahay?

Tani waxaa dhici karta in aysan keenin haba yaraatee isbeddelo kugu yimaada adiga, laakiin waa hal dariiqo oo ODDS ay ka shaqayneyso sidii adeegyada looga dhigi lahaa mid daahfurannaan dheeraad ah leh oo ay sahlan tahay in la isticmaalo.

Adeega koox ahaaneed ma maamulo qorshahaaga, ama ma go'aamiyo kuwa ay yihiin adeegyada aad heli doonto. Taasi waxa ay ku xiran tahay adiga iyo kooxdaada!

"Ha ilaawin, naftaada adigaa maamulkeeda leh, waxaanad go'aansan kartaa noocyada adeegyo iyo taageerooyin ee kugu habboon. Haddii aadan ku raacsanayn natiijooyinka adeegaaga koox ahaaneed, u sheeg iskuduwahaaga adeegyada ama wakiilka shakhsiyeed. Codkaaga waa mid muhiim ah."

- Gabrielle Guedon, Agaasimaha Sare, OSAC

Waa maxay adeega koox ahaaneed?

Qiimeyntaada Baahiyaha ee Oregon ayaa go'aamin doona adeegaaga koox ahaaneed. Adeegaaga koox ahaaneed ayaa cayimi doona qiimaha laga yaabo in adeeg bixiyaha la siiyo si uu kuu taageero.

